



## EUCAP SOMALIA

Hawlgalka Tayeynta Midowga Yurub ee Soomaaliya

WAR-SAXAAFADEED

**Baahin DEG DEG AH**

Muqdisho, Luulyo 2022

Wixi su'aala saxaafadda oo keliya, la xiriir:

Xafiiska Warbaahinta iyo Warfaafinta oo emailkiisa hoos kuxusan,

[press@eucap-som.eu](mailto:press@eucap-som.eu)

**EUCAP SOMALIA: Hawlgalka Rayidka ah ee Midowga Yurub ee Soomaaliya ayaa u dabaaldegay sannad-guuradii 10-aad ee ka soo wareegtay markii la aasaasay.**

**Talaado, Luulyo 16, 2022: IC Camp Muqdisho, Soomaaliya,**

Hawlgalka Tayaynta Midowga Yurub ee Soomaaliya (EUCAP Somalia) ayaa hadda tobantoban sano jirsaday. Muddadii tobanka sano ee uu shaqeynayey, howlgalku waxa uu gacan ka geystay xoojinta awoodda hay'adaha dowladda ee Soomaaliya ee dhinaca badda, booliska iyo dib-u-habeynta sharciga.

Waxaa mahad mudan iskaashiga miro dhalka leh ee hay'adaha Soomaaliyeed, sida Wasaaradda Amniga Gudaha (MoIS), Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda, Ciidanka Booliska Soomaaliyeed (SPF), Maamulka Badaha Soomaaliyeed (SMA), INTERPOL, Xafiiska Dhexe ee Qaranka (NCB).

Dhinaca badda, howlgalku waxa uu bixiyay tabobarro lagu baaro iyo qabsashada maraakiibta - waxa loogu yeero "ship-in-a-box" -, tababaro iyo qalabayn lagu sameeyay saddexda dekedood ee Soomaaliya ugu waaweyn, waxana ay gacan ka geysteen dhismaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed iyo xarunta unugga badda ee Muqdisho oo kaashanaysa hawlgalayaasha Midowga Yurub.

EUCAP waxa kale oo ay xoojisay awoodda Maamulka Badda Soomaaliya si ay u dejiso qaab-dhismeedka shaqo ee bilowga ah, iyada oo la siinayo farsamo badeed, waxana ay taageertay ku biirista heshiisyada caalamiga ah ee badaha qaab-dhismeedka sharci ee Soomaaliya.

Dhowaan, EUCAP Somalia waxay ahayd Hawlgalkii ugu horeeyey ee Midowga Yurub oo u dira koox takhasus u leh bixinta tababarada baddaha, oo ay ku jiraan fayadhowrida qalabka badda.

Dhinaca Booliska, iyadoo lala kaashanayo saaxiibada kale ee caalamiga ah, howlgalku wuxuu sare u qaaday horumarinta booliska iyo kordhinta wada shaqeynta Ciidamada Amniga Soomaaliya.

Marka la eego heirka istaraatijiyadeed, Howlgalku wuxuu gacan ka geystay dib u eegista qorshaha kala guurka ee Soomaaliya 2021-2022 iyadoo la eegayo ka bixitaanka Ciidamada Midowga Afrika (AMISOM) iyo Howlgalka Ku Meel Gaarka ah ee Midowga Afrika ee Soomaaliya (ATMIS), iyadoo diiradda la saarayo sidii looga gudbi lahaa "Milatari ilaa Bilays" si loo wanaojiyo sugidda amniga iyada oo loo marayo boolis rayid ah.

EUCAP waxay kala shaqaynaysay Somali INTERPOL NCB si ay u kordhiso awoodoodda la dagaalanka dambiyada abaabulan ee ka gudba iyo kasbashada u hogaansanaanta dhamaan 19-ka siyaasadood ee



## EUCAP SOMALIA

Hawlgalka Tayeynta Midowga Yurub ee Soomaaliya

INTERPOL, kuwaas oo 11 ka mid ah la gaaray. EUCAP waxa kale oo ay taageertaa horumarinta Qorshe-hawleedka awood-siinta haweenka ee qaybta badda.

Qorshahan ayaa waxaa taageertay Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Qoyska ee Soomaaliya (MoWFA) waxaana lagu dhaqan gelinaya Heer Federaal iyo Heer maamul goboleed.

*"EUCAP Somalia waxay siisay maamulka badaha xirfadaha iyo qalabka lagama maarmaanka u ah inay qabtaan shaqada aasaasiga ah ee ilaalinta xeebaha. EUCAP waxay sidoo kale gacan ka geysatay tababarida ilaa 700 oo Darwiish federaal oo ah ciidan bilays oo adag oo loo xilsaaray inay suaan amniga dhulalka laga xoreeyay kooxda A-Shabaab. Maanta, Soomaaliya waxay weli wajaheysaa caqabado amni oo ballaaran. Laakin dadaalka CSDP-da, burcad-badeednimadu hadda maaha khatar weyn oo ku wajahan maraakiibta caalamiga ah ee Geeska Afrika"* ayuu yiri HR/VR Josep Borrel munaasibadda Sannad-guurada 15aad ee Hawlgalka Siyaasadda Amniga iyo Difaaca Guud ee May 2022.

Hawlgalka EUCAP Somalia wuxuu sii wadi doonaa xoojinta guulaha sanadaha soo socda, xoojinta waajibaadka iyo kor u qaadida hindisayaasha iyo kobcinta awoodda Booliska iyo waaxaha Amniga Badaha.

### Ku saabsan EUCAP Somalia

EUCAP Somalia waa howlgalka Midowga Yurub oo markii ugu horeysay loo asaasay EUCAP Nestor, oo ah howl-gal heer gobol ah oo lagu dhisayo awoodda badda, diiradda lagu saarayo ka hortagga burcad-badeedda, bishii Luulyo 2012 waxaana loo beddelay EUCAP Soomaaliya 2016.

Howlgalka ayaa qeyb ka ah qorshaha dhameystiran ee Midowga Yurub uu ku wajahayo Soomaaliya, kaasoo ay ku jiraan hindiseyaal diblomaasiyadeed, kaalmo horumarineed, gargaar bani'aadanimo, sharci fulinta iyo ku dhaqanka sharciga.

EUCAP Somalia waxay si dhow ula shaqeysaa Ergada Midowga Yurub ee Soomaaliya, labada howlgal ee kale ah EU-da Amniga iyo Difaaca Wadajirka ah (CSDP) ee kala ah: Hawlgalka Tababarka Milliteri ee EUTM Somalia iyo La-dagaalanka Burcad-badeedda EUNAVFOR Hawlgalka Atalanta, iyo sidoo kale saaxiibada caalamiga ah sida UNODC, UNSOM, UNOPS, IMO iyo INTERPOL.

###